Seattle Department of Education & Early Learning

SEATTLE PRESCHOOL PROGRAM

Barnaamijka Dugsiga Hore ee Seattle (SPP) 2026-27 Tusaalooyinka Bixinta Lacagta Waxbarashada

Xeerarka bixinta kharashka Waxbarashada

1. Daboolida Hab-raaca SPP: Lacagta waxbarashada SPP waxay daboolaysaa 6 saacadood ama 10 saacadood maalintii oo ah barnaamijka SPP, iyadoo ku xiran nooca diiwandgelinta ilmahaaga. MA DABOOSHO kharashka daryeelka ilmaha ee ka baxsan saacadaha caadiga ah ee dugsiga SPP (tusaale: daryeelka ka hor/ka dib dugsiga, ama daryeelka dheeriga ah) ama daryeelka la bixiyo xilliyada fasaxyada dugsiga. Fadlan eeg jadwalka muunada hoose wixii faahfaahin dheeraada ah.
2. Sannad-Dugsiiyeedka (10-bilood): Xilliga biilasha waa Oktoobar ilaa Juun. Sannadka Buuxa (12-bilood): Xilliga biilasha waa Oktoobar ilaa Agoosto.
3. Maqnaanshaha iyo Xirnaanshaha: Lacagta waxbarashada ***lama dhimi doono***/qaybin doono iyadoo loo eegayo maqnaanshaha caadiga ah ee ardayda ama xirnaanshaha caadiga ah ee hay'adda (tusaale: fasaxyada dugsiga, ciidaha, ama xirnaanshaha saamaynta hawada).
4. Biilasha waxbarashada bishii waxaa lagu so diri doonaa iimaylka koowaad ee faylka laga bilaabo Oktoobar 2026.
5. Waaxda Waxbarashada iyo Barashada Hore waxay bixisaa 10% dhimis ah walaal kasta oo dheeraad ah oo ku jira barnaamijka SPP.

Maareynta Lacagta waxbarashada

1. Haddii dakhligaaga ama tirada qoyskaagu isbeddesho, iimeel u dir kooxda diandgelinta SPP ka hor xilliga kama dambaysta ah si isbeddellada loogu muujiyo biilka bishaas. Haddii la soo sheego ka dib xilliga kama dambaysta ah, isbeddelladu waxa lagu dabaqi doona biilka bisha xigta.
2. Carruurta bilaabaya ama ka baxaya badhtamaha bisha, waxbarashada waxa loo habayn doonaa sida soo socota:
   - Bilaabida ka hor 15-ka ama ka bixida ka dib 15-kawa → . Lacagta oo buuxda.
   - Bilaabida 15-ka ama ka dib, ama ka bixida 15-ka → 50% lacagta.

Jadwalka biilasha

Bisha qaansheegta	Sep	Oct	Nov	Dec	Jan	Feb	Mar	Abriil	May	Jun	Jul	Agoosto
Taariikhda Kama Dambaysta ah ee Isbeddellada	Ma jiraan biilal la dirayo	10/3/26	11/3/26	12/3/26	1/3/27	2/3/27	3/3/27	4/3/27	5/3/27	6/3/27	7/3/27	8/3/27
Biilasha wa la diray	Ma jiraan biilal la dirayo	10/8/26	11/9/26	12/9/26	1/11/27	2/9/27	3/9/27	4/9/27	5/10/27	6/9/27	7/9/27	8/10/27
Taariikhda Waqtiga Lacag-bixinta	Ma jiraan biilal la dirayo	10/23/26	11/24/26	12/24/26	1/26/27	2/24/27	3/24/27	4/24/27	5/25/27	6/24/27	7/24/27	8/25/27

Jadwalka Tusaalaha ah: Maalinta Barnaamijka Dugsiga ka hor iyo Qaabka Bixinta Lacagta

MAALINTA DUGSIGA SPP	**DARYEELKA KA HOR** DUGSIGA	**DARYEELKA KA DIB DUGSIGA**
SPP 6-saacadood ah: 9:00 AM–3:00 PM*	(Waa ikhtiyaari)	(Waa ikhtiyaari)
SPP 10-saacadood ah: 7:30 AM–5:30 PM*	7:00–9:00 AM*	3:00–6:00 PM*
Kharashka SPP: Lacagta barnaamijka SPP oo ku bixi karta miisaanka la hagaajiyay	Kharashka waxaa go'aamiya bixiyaha daryeelka (provider).	
Bixinta Lacagta: Ku bixi Magaalada Seattle/SPP (eeg Qaybta Doorashooyinka Lacag-bixinta).	Bixinta Daryeelka Dheeraadka ah: Waa in si toos ah loo siiyo bixiyaha daryeelka (kaalmo dhaqaale ama jeebkaaga).	

** Fadlan ogow, kani waa jadwal Tusale ah. Saacadaha rasmiga ah ee hawlgalku way kala duwan yihiin iyadoo loo eegayo bixiyaha daryeelka, dhammaan bixiyeyaashuna ma bixiyaan daryeelka ka hor/ka dib dugsiga.*

Bixinta Lacagaha

1. Lacag bixinta waxa lagu salaynayaa jadwalka biilasha.
2. Ka hubi qaybta ikhtiyaarka lacag bixinta faahfaahinta sida iyo meesha aad wax ku bixinayso.
3. Lacag bixinta taleefoonka ama khadka tooska ah, diyaarso aqoonsigaaga macmiilka iyo qaansheegtaada #.
4. Haddii aad ku bixinayso jeek ama money order, ku qer: "City of Seattle-SPP."

Ikhtiyaarada Lacag-bixinta	Sida loo Bixiyo	Noocyada Lacag-bixinta
Online (Sida ugu wanaagsan)	Adeegso marinka biilasha: Lookup Account Details (billerpayments.com)	Waxaan u baahanahay aqoonsiga macmiilka iyo # qaansheegta Wixii ka yar $3,000: Adeegso kaarka ama koontada bangiga. Wixii ka badan $3,000: Koontada bangiga oo keliya.
Boostada (Sida ugu wanaagsan)	City of Seattle - SPP Waaxda Maaliyadda – Xisaabaadka Lacagaha La Qaadanayo PO Box 94626 Seattle, WA 98124-6926	Jeeg ama Money Order Hubi inay ku qiran tahay "City of Seattle – SPP" dhammaan jeekaga ama money order-ka.
Taleefanka (Kaliya marka Khadka lacag bixinta ee onlaynka ah aanu diyaar ahayn)	Khadka Lacag-bixinta Magaalada: (206) 684-7800 Saacadaha: 8:30 subaxnimo ilaa 3:00 galabnimo	Visa/Mastercard Waxaan u baahanahay aqoonsiga macmiilka iyo # qaansheegta
Qof ahaan	Seattle Municipal Tower Dabaqa 4-aad, Miiska Lacag-bixinta/Warbixinta 700 5th Avenue Seattle, WA 98104 Saacadaha: 8:30 subaxnimo - 4:00 galabnimo	VISA/Mastercard, Lacag caddaan ah, Jeeg
	Xarumaha Adeegga Macmiilka http://www.seattle.gov/customer-service-centers	

Caddaynta Lacag-bixinta - Ujeeddooyinka Macluumaadka Kaliya

1. Si xushmad leh, SPP waxay soo diri doontaa qoraalada taariikhda waxbarashada laba jeer sannadkii, Febraayo iyo Luulyo
2. Warbixin dheeraad ah oo lacag-bixineed, fadlan codsi iimayl ah u soo dir: SPPbilling@seattle.gov

Nala Soo Xidhiidh

1. Su'aalaha Lacag-bixinta Iimayl: SPPBilling@seattle.gov
2. Su'aalaha Lacag-bixinta Taleefanka: 206-684-5660
   Saacadaha: 8:00 subaxnimo - 4:00 galabnimo

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo ee Barnaamijka Dugsiga Barbaarinta ee Seattle

Goorma ayay tahay lacag-bixintayda?
Lacag-bixinta waxa lagu salaynayaa sida ku cad Jadwalka qaan-sheegga ee sare ama taariikhda ku qoran qaan-sheegga.

Halkee ayaan ka heli doonaa biilasha waxbarashada bisha?
Qaansheegyada waxaa lagu soo diri doonaa iimaylka taariikhda biilka iyadoo loo dirayo cinwaanka iimaylka ee ugu weyn ee ku qoran akoonkaaga, waxaana laga soo diri doonaa Magaalada Seattle cinwaanka info@seattle.gov. Haddii aadan helin iimaylka, ka hubi galkaaga spamka. Si aad u hubiso inaad heshay iimaylada, ku dar " info@seattle.gov " sida Soodire Badbaado leh ama calaamadee in uusan ahayn SPAM.

Maxaa dhacaya haddii aan daaho ama aanan bixin karin waqtigii loogu talagalay?
Haddii xaaladda dhaqaale ee qoyskaaga ay isbedeshay oo aadan lacag bixin karin, la xiriir xafiiska biilasha. Waxaa laga yaabaa inaad u qalanto dhimista waxbarashada waxaana laga yaabaa inaad dejiso qorshe lacag-bixineed. Iimeelka Su'aalaha Biilasha: SPPBilling@seattle.gov.

Maxaan sameeyaa haddii uu khalad kU jiro biilka waxbarashada?
Fadlan u sheeg xafiiska biilasha ee SPPbilling@seattle.gov haddii uu qalad ku jiro biilkaaga. Shaqaalaha DEEL ayaa wada shaqayn doona si ay u go'aamiyaan in beddelka kharashka waxbarashada loo baahan yahay iyo in kale.

Ma aqbashaan lacag-bixinno qayb ah ama ma bixisaa qorshooyin lacag-bixineed?
Waxaan aqbalnaa dhammaan xadiga lacag bixinta waxaanan u bixinaa qorshooyinka lacag bixinta kiis-kiis. Fadlan kala xidhiidh xafiiska biilasha ee SPPbilling@seattle.gov wixii macluumaad dheeraad ah.

Maxaa dhacaya haddii dakhligaygu isbeddelo oo aan jeclaan lahaa in qaddarka kharashkayga waxbarashada la hagaajiyo?
Fadlan la xidhiidh preschool@seattle.gov oo wata dukumeenti dakhli oo la cusboonaysiiyay. Wakiilka qaabilaadda barnaamijka ayaa kaala soo xiriiri doona dhexda. Korodhka dakhliga uma baahna in la soo sheego sannad dugsiyeedka; si kastaba ha ahaatee, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad dib u xaqiijiso dakhligaaga haddii aad ku noqoto SPP sanadka labaad.

Waaxda biilasha ee SPP ma saxiixi kartaa foomkayga Xisaabinta Kharashka Dabacsan (FSA)?
Maya, bixiyahaga xanaanada Dugsiga ka hor wuxuu u baahan doonaa inuu saxiixo foomkaaga FSA maadaama ay yihiin kuwa bixiya daryeelka oo xaqiijin kara ka qaybgalka. Waxaan ku faraxsanahay inaan ku siino kharashyada/lacag-bixinta oo kooban si aad ula wadaagto adeeg bixiyahaaga; si aad u codsato so koobidda lacag bixinta, fadlan iimayl u soo dir: SPPbilling@seattle.gov.

Ma jirta lacag waxbarasho oo igu maqn oo la bixiyo xilliga xagaaga?
Haan, haddii ilmahaagu ku qregistered yahay fasalka SPP ee sannadka buuxa (12-bilood), waxaa laguu biilin doonaa lacagta waxbarashada xilliga xagaaga. Isla heerka bishii ayaa lagugu dabaqi doonaa inta lagu jiro bilaha xagaaga.